

Tilmaame Kursiga Amaanka Caruurta



Kursiga Xaga Dambe loo Jeediyo

- Ilmaha culeykiisu ka yar 20 rodol (lb), ama 1 sano waa khasab in lagu fadhiisiyo kursiga xaga dambe loo sii jeediyo.



Kursiga xaga hore loo Jeediyo

- Ilmaha 1 sano ka weyn ama
- Culeyskiisu ka badan yahay 20 rodol (lb).



Kursiga buusterka ee suunka lagu xidho

- Laga bilaabo bisha July 1, 2009, caruurta ka yar 8 sano, kana gaaban 4 fiit iyo 9 inji, wuxuu sharcigu qorayaa in ay ku xiran yihiin kursiga buusterka.
- Kursiga buusterka waxaa loogu talo galay ilmaha dhererkoodu yahay 4 fiit iyo 9 inji, oo badanaaba da'doodu u dhaxeeyso 4-8 sano.

Sharciga Xakamaynta ee Ilmaha Rakaabka Ah (MN Stat 169.685, sub.5)

- Caruurta 8 sanadood ka yar, kana gaaban 4 fiit iyo 9 inji waa in lagu xidho kursiga amaanka oo qancinaya dhammaan xeerarka ammarka ee federaaliga ah.
- Kuraasta amaanka waa in lagu xiro ama lagu rakibo gaariga ayadoo loo tixraacayo lana dhawrayo xeerarka iyo tilmaamaamaha warshada kuraasta.
 - Cunuga waa in lagu ogaado kursiga amaanka
 - Waa khasab in kursiga si hagaagsan gaariga loogu xidho iyada oo la isticmaalayo suunka gaariga ama birta loo yaqaan LATCH.
 - Ilamaha (1 sano ka yar culayskoodana uu ka yaryahay 20 rodol) waa in lagu fadhisiyo kursiga gadaal u jeeda
- Sharciga waxaa lagu dabaqayaa dhammaan gawaarida leh suumanka kursiga ee markii horeba warshadda lagaga soo rakibay
- Sharciga waxaa lagu dabaqayaa dhammaan meelaha lagu fadhiisto
- Darawalka ayaa masuuliyadda leh
- Ganaaxa dembiga yar waa \$50 (waxayna u badantahay in la cafiyo haddii eedeysanaha uu ku caddeeyo 14 cisho gudahooda inuu gaariga ku rakibay kursiga ammarka)
 - Sharcigu wuxuu qabanayaa kuwa deggan iyo kuwa aan degganayn gobolkan Minnesota
 - Kursiga amaanka oo la isticmaalin waa sabab fiican oo gaari socda lagu joojin karo

Waxaa ka reebaan ama laga cafiyey in kursiga amaanka ee gaariga lagu xiro:

- Caruurta saaran gawaarida gurmada dag daga ah ee caafimaadka kuwaas oo aysan u suurto galayn in lagula xiro kursiga amaanka waqtigaas
- Caruurta saaraan gawaarida la ijaarto, uu kamid yahay tagsiga, limoosiinka ama baska, laakiin waxaa ka reebaan gawaarida la soo kiraystay, ama gawaarida qof laga soo amaahday
 - Caruurta saaran gaariga boliiska oo howlaha rasmiga ah qabanaya, marka aan gacanta lagu hayn kursiga amaanka (suunka gaariga waa in lagu badali karaa)
 - Caruurta uu dhakhtar soo caddeyey inay qabaan xaalado caafimaad, awood ahaan ama itaal darri ama xaga maskaxda (xiska) ka jiran oo xakamaynta lagula xirayo kursiga amaanka ay ka dhigayso wax aan suurto gal ahayn amaba habboonayn
 - Rakaabka basaska dugsiyada ama iskuulada

Waaxda Amaanka Dadweynaha ee gobolka Minnesota (Minnesota Department of Public Safety). June, 2009